**Sharciga lamba. 41 ee 13 Setembar 1973.**

**Sharciga lagu Bixiyo Dhulaka Horumarinta Dhismaha**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu arkay Warqadda Koowaad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969 iyo Xeerka lamba. 1 ee 21 Oktoobar 1969;

Marka uu tixgaliyay baahida loo qabo in laga soo saaro xeer midaynaya bixinta dhulka horumarinta dhismaha Jamhuuriyadda Soomaaliya;

**WUXUU MEELMARIYAY**

Xeerka soo socda:

**Cutubka 1aad**
召Ararta

**Qod. 1**
**Qeexidda**

Haddii aan si ka duwan loo dhigin dulucda: ereyga “Cad dhul” waxaa ka mida dan iyo xaq kasta ee dhul lagu leeyahay.

Ereyga “Wasaarad” waa Wasaaraddaa Hawlaha Guud.

Ereyga ah “ Xoghaye” Waxaa loola jeedaa Wasiirka Hawlaha Guud.

**Qod. 2**
**Milkiyadda Maguurtada Guud**

1. Milkiyadda maguurtda guud waxay u kala baxdaa demanyaale iyo keyd maaliyadeed.
2. Demanyaale waa hantida Dawladda ama Dawladaha Hoose oo si joogto ah u taagan adeegga caamka. Keydka maaliyadeed waa wixii kale ee hanti maaliyadeed ee guud.

**Qod. 3**
**Hantida Dawladda (Demanyo)**

1. Dawladdu ayaa leh:
   a) Xeebta, barxadda badda, dekedaha, khuuriyada, marsooyinka, godadka badda, sidoo kale barkadaha biyaha dhanaan oo caafimaad ahaan badda ku dhaca, hawlgallada Dawlladda ka mida ee horay u sii jiray;
   b) harooyinka dabiiciga iyo biyo dur-durrada aan go’in, xitaa kuwa dhulka hoostiisa mara oo leh khadad aaasaasi ah oo burqada;
   c) dhufaysada, dekadaha iyo garoomada dayuuradaha ciidamada iyo guud ahaan hawlaha sida joogtada loogu talagalay diffaaca qaranka;
2. Dawladda ayaa iska leh, haddii aanay ahayn milkiyad cid gaara:
   a) gobaha, barkadaha iyo kanaalada macmilka ah;
   b) ilaha dabiiciga, ceelasha, dararka waraabka ee adeegga dadweynaha u furan, qasabadaha biyaha iyo naashleyda (fontane);

c) waddooyinka, marinada, barxadaha, waddooyinka, jidadka tareenka, waddooyinka baabuurta, jidadka safarrada dadweynaha loogu talagalay, goobaha nasashda safarrada ama xoolaha, suuqyada;
d) garoomada dayuradaha rayidka;
e) qalabka taararka, raadyaasha taararka, telefoonada, raadyayaasha telefoonada iyo tefeshinada;
f) goobaha iyo dhismooyinka sida joogtada loogu talagalay hawlaha caamaka ee Cibaddada Diinta Islaamka iyo xabaalaha
g) magoortooyinka loo aqoonsaday in leeyihiin dano taariikheed, degel-baaris ama farashaxan, sidoo kale uruurin miyuusikada, arkiifiyada mataxafka iyo maktabadaha.

**Qod. 4**
**Keydka Maaliyadeed ee Dawladda**

1. Hantida aan demnyaalaha aan ahayn ee oo Dawladdu leedahay waa keyd maaliyadeed.
2. Waxaa ka mid keydka maaliyadeed dawladeed sikastaba:
   a) Hantida magguurtada ee aan cid gaara lahayn;
   b) goobaha macdanta laga qodo iyo batroolka;
   c) xeryaha iyo hubka ciidamada.

**Qod. 5**
**Keydka maaliyadeed ee Hay'adaha Dawladda**

Hantida aan ahayn kuwa demanyaalaha ee Dawladaha Hoose iyo Wakaaladaha Dawladda waa keyd maaliyadeed oo ka tirsan milki isla Dawlado Hoose ama Wakaladaha Dawladda.

**Qod. 6**
**Shuruudaha sharciyeed ee Demaanyada Guud**

1. Hantida demanyaalaha ee Dawladda iyo Dawladda Hoose lagama ganacsan karo, lama wareejin karo mana aha kuwo mudda dhaaf leh oo cid saddexaad ku qaadan karto. Mana noqon karaan hanti dhab ah oo cid saddexaad ay hanan karto, haddii xadka Xeerar gaarka ee quseeya aan la soo marin;
2. Masuuliinta Maamulka ayaa u xilsaaran ilaalinta hantida ka mida Hanitada Demanyaalaha Guud. Iyagu waxayn iqtiyaar u leeyihiin in ay u maran qaabka maamulka ama hannaanka caadiga marka loo eego diffaacooda milkiyadda ama haysashada.

**Cutubka 2aad**
Shuruuc Guud

**Qod.7**
**Lahaanshaha dhulka**

Si wafaqsan Xeerkaan, dhammaan cadadka dhulka Jamhuuriyadda, gacan ha ku jiro ama yaan ku jirine waa milki Dawladeed.

**Qod. 8**

**Shuruudaha Adeegsiga Dhulka Sababo la Xariira Ammaanka Qaranka**

Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka wuxuu awoodaa, marka uu ku ku soo taliyo Wasiirka Arrimaha Gudaha, in uu dekereeto, ku xadeeyo isticmaalka Dhulka Jamhuuriyadda Demoqaradiga Soomaaliya sababa la xariira ammaanka qaranka iyo danta guud.

**Qod. 9**
**Helitaanka Dhulka Sababa la Xariiro Siyaasado**

Haddii dhulka ay dan guud ku jirto, Wasiirku wuxuu dekereeto ku xoola-tiri karaa, dhulkaas marka la bixiyo qiima u dhigma iyo magdhaw ku habboon.

**Qod. 10**
**Qaababka lagu Helayo Dhulalka Magaalada**

Qaababka lagu helayo dhulalka magaalada ha ahaadeen ruqsado ama lahaansho, waxaa lagu caddayn doona nidaamyo gaara.

**Cutubka 3aad**

**Qod. 11**
**Ruqsadaha Dhismaha**

Wasiirka wuxuu awood u leeyahay, isagoo Xeerkaan u hoggaansamaya, in uu siiyo ruqsado hantida demanyaalaha maamul kasta ee Dawlad Hoose, hay'ad madax bannaan, koox dad samaysaty iskaashato iyo shaqsiyaad gaara, laguna siiyo shuruudaha iyo qaababka uu xeerku dhigayo.

**Qod. 12**
**Ruqsadda Lacagta lagu Bixiyo**

1. Ruqsadda la soo sheegay waa lacag iyadoo la bixinayo lacag cayiman ee mitirka laba jibbaarma oo kale, marka laga reebo xaaladaha gaarka oo dekereeto sababaysan lagu sheegay, in lacagta looga dhaafay;
2. Qiimaha midaysan ee u degsan mitir laba-jibaarka ee nawaaxiga dhulka dhismaha ee dadka gaarka iyo hay'adaha dawladda la siinayo, dekereeto ayaa lagu sheegi doonaa.

**Qod. 13**
**Waajibaadka Ruqsad la-siiyaha**

1. Ruqsad la-siiyaha waxaa ku waajiba:
   a) In uu dhulka u isticmaalo ujeedooyinkii loo siiyay, marka laga reebo marka la siiyo oggolaasho cad oo Wasaardda Hawlaha Guud oo arrinta waxka baddasha;
   b) In uu si joogta u bixiyo canshuurta ruqsadda, sidoo kale canshuurta iyo canshuurta kale sii saaran dhulka iyo dhismayaasha horay u jiray ama kuwa mustaqbalka jiri doona;
   c) In uu bilaabo iyo ku dhammeeyo hawlaha dhismaha shuruudihii ruqsadda lagu bixiyay;
   d) U hongaasmo hannaanadi dhismaha iyo Nidaamka Qorshayaasha iyo shuruucda jira ee lagu nidaaminayo hawlaha.

2. Jabin kasta ee qodobada la soo sheegay waxay sababi karta in lagala noqo ruqsadda iyadoo wax magdhow ah aan la siinayn, iyo in la dumiyo qaybahii la dhisay ee aan la fasaxin muddo aan ka badnayn sanad.
   Masuuliinta shaqada ku leh waxay kaloo amri karaan arrima la xariira hagaajinta magaalada, joojinta hawlihii la bilaabay iyo wax ka baddalka lagu sameeyay mashruuca, meelaha qaarkood ee ruqsadda iyadoo ruqsad la- siiyaha aanu wax xuquuq lahayn

**Qod. 15**
**Muddada ay Soconaaayso Ruqsadda**

Muddada ay soconayso ruqsadda waa soddon sano sida qodobada Xeerlaanu qabaan, waana kuwa soo socda:

1. a) Muwadiniinta soomaalida oo ruqsadda loo siiyo si isku bixisa marka uu wada guto shuruudaha Xeerkaaanu dhigo;
   b) shisheeyaha ruqsadda la siiyo muddo aan ka yareyn 50 sano kana badnayn 99 sano;
2. Ruqsadaha dhulka la siiyo shisheeyaha, kadib marka ay dhammaato muddadi bilawga, Wasiirku waa u cusboonaysiin karaa, markasta, muddadaas mid la eg ama ka yar;
3. Saaso ay tahay, arrinta baaragrafka sare la soo sheegay, qaababka ruqsadaha dhulka loo bixiyay ulajeeddooyin kashifaadda (baarista macdanta) iyo kaawooyinka waxaa nidaaminaya Xeerar gaara ee maaddadaas ka jira.

**Qod. 16**
**Cinwaanka Mikiyadda ama Helitaanka Lahaanshaha**

Marka shuruudaha dhigan la wada guto waajibaadka Xeerku jidaynayo, ruqsad la-siiyaha wuxuu noqonahyaa miilkiilaha hawsha meesha laga qabtay.

**Qod. 17**
**Ruqsadahiii Hore**

Ruqsadda ama hanashada dhulka magaalooyinka ee Xeerkaan ka horreeyay waa in la waafajiyaa waxyaabaha Xeerkaan ku qoran muddo ku siman sanad dhexdiis, haddii kale waa ay ka dhacaysa ruqsaddu.

**Qod. 18**
**Qaababka ku Saabsan Ruqsadda Dhulka**

1. Codsiga ruqsadda dhulka waa in la geeyaa Waaxda Demaanyada, ama cidda ka wakiilka masuuliinta Gobollada iyo Degmooyinka;
2. Codsiga waa in lagu soo sheegaa waxyaabaha looga baahanyahay, dhulka la weydiistay, haddii ay suurtgal tahay, naqashadda;
3. Inta aan ruqsadda la bixin ama la oggolaan gacan ku haynta ruqsadda, waxaa lagu sameynayaa dhammaan xaqiijimada loo baahanyahay oo ku saabsan helitaanka dhulka. Marka lagu hubiyo qalabka ku habboon, helittaanka dhulka, ayaa dhulka la bixinayaa si

waafaqsan qorshaha nidaamkaa. Illaa dhibaata muuqato ee xagga dhulka ay timaaddo mooye, ruqsadda noqon mayso mid kama dambaysa.

**Qod. 19**
**Ruqsadaha Dhismooyinka Safaaradaha**

Iyo wakiilada shisheeyaha Soomaaliya jooga
Waxaa Safaaradaha lagula heshiin karaa iyo shisheyaha soo martiyay Jamhuuriyadda Demoqaraddiga Soomaalia, iyo Xukuumadaha khuseeya waxay Safaaradaha kula heshiin karaan iyo Wakiilada Soomaaliya u jooga ay dalalkooda xaalado wax is-dhaafsi.

**Qod. 20**
**Dhul-hagaajinta Dhulka**

1. Marka dhulka ay Dawladdu, Maamulka maxalliga ama Hay'ad Madax bannaan hagaajiso, ka faaidaystaha waxaa la weydiisan karaa soo celinta kharashka hagaajinta ay galeen iyado lagu saleeynayo halbeegga ay Masuuliinti ay tilmaameen.
2. Kharaska hagaajinta duurka waxaa lagu darayaa dhul kasta oo ay tahay in lacag laga bixiyo.

**Qod. 21**
**Xilalaka**

Ruqsaduhu waxay noqon karaan "Demanyaale iyo Munishibaale.

Ruqsadaha Demanyaalaha waxaa bixiya Waaxda Demanyaalaha ee Wasaaradda Hawlaha Guud, ama wakiiladooda Gobolllada iyo Degmooyinka.

Ruqsadaha Dawladaha Hoose (Munishibaale) waxaa bixiya Dawladaha Hoose, nawaaxiga loogu talagalay in laga bixiyo Demaanyada si waafaqsan qod. 11 ee Xeerkaan. Ruqsadaka Munishibaalaha waxaa laga dhisi karaa dhismaayaasha nooca baraakada, sida: Cariish, mundul, aqal soomaali, iyo la mida.

**Qod. 22**
**Kala Noqoshada Ruqsadda**

1. Haddii ay dhacdo xil-gudasho la'aan ruqsadda waa lala noqon karaa gebi ahaan ama qayb ahaan iyadoo ruqsad la-siiyahaa aanu xaq u lahayn wax xaq oo abaalgud ah ama cawil-celin;
2. Wixii ku saabsan hawlo horay u jiray markii laga noqday, Maamulku wuxuu xaq u yeelanayaa in uu sii haysto, isagoo wax bixinaya ama ka bixinaya ruqsadda cusub kharashka uu ruqsad la-siiyaha uu galay.

## Qod. 23
## Mamnuucidda Dul-macaashka

1. Waxaa reeban qaab kasta ee dul-macaashaka dhulka, ha ahaado demanyaale ama Munishibaale. Ruqsad la siiyaha lama iibin karo dhulka la siiyay, hasayeeshe waa in uu u isticmaalo ulajeeddadi loo siiyay si waafaqsan nidaamka qorshaha;
2. Haddii ruqsad la siiyaha aanu ku dhisin, muddadii loo qabtay, wuxuu u soo celin karaa dhulka Maamulka iyadoo ay wehliyaan dokumentiyadii ruqsada, oo weydiisan kara Dawkadda in loo soo celiyo lacagtii uu baxshay.

## Qod. 24
## Nidaamka Qorshaha

Xarun kasta oo la degganyahay waxay yeelanaysaa nidaam qorshaysan oo laga soo shaqeeyay oo ay oggolaadaan xaafiisyada farsamada shaqada ku leh ee Wasaaradda Hawlaha Guud oo gacan ka helaya Masuuliinta maxalliga.

## Qod. 25
## Dhismayaasha aan la Jaan Qaadi Karin Nidaamka Qorshaha

Haddii ruqsad la-siiyaha uu dhiso dhisma kasta oo khilaafsan nidaamka qorshaha dhismayaasha jira, dhismahaas waa la dumi karaa marka laga reebo haddii horay uu oggolaasha loo haystay.

## Qod. 26
## Iskaashatada Dhismaha

Dawladdu waxay ku taageeraysa abuurida iskaashatooin dhisme shaqaalaha dhexdooda shuruuc ku wajahan fududaynta bixinta ruqsadaha dhulalka, iyadoo la siin karo amaahyo iyo caawimaad farsamo.

## Cutubka 4aad

Diiwaangelinta Dhulka

## Qod. 27

## Diiwaanka Dhulka – Hantidhowrka

1. Waa waajib keydinta diiwaanka kaasoo lagu qorayo dhammaan waxyaabaha ku saabsan dulka, hawshaas oo ay qabanayso Waaxda Demaanyada ee Hawlaha Guud iyo masuuliinta Gobollada iyo Degmooyinka;
2. Diiwaangelinada maguurtada ee diiwaanka, sida uu qabo Xeerkaan, waa in lagu saleeyaa gacan ku ahayn sugan, qoraal, ama xukun Maxkamadeed wixii ka khuseeya dhulka.

## Qod. 28
## Hubinta Diiwaanka Dhulka

Diiwaanka dhulka waxaa daalacan karaa, inta lagu jiro saacadaha caadiga ee shaqada xaafiiska, cid kasta oo bixiso canshuurta Xeerkanu qorayo.

**Cutubka 5aad**
Nidaamyada Gunaanadka

**Qod. 29**
**Wakiilashada Awoodaha**

Wasiirku wuxuu u wakiilan karaa awoodda uu Xeerkaanu siinayo, Masuuliinta Gobollada iyo Degmooyinka shaqada ku leh.

**Qod. 30**
**Xeererka Nidaaminta**

Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka, wuxuu awoodaa, marka uu ku soo taliyo Wasiirka, in uu soo saaro Nidaamyo si habboon loogu fulinayo Xeerkaan.

**Qod. 31**
**Ciqaab**

Jabinta Xeerkaan, ka sokow ciqaabaha ku qoran qodobada 22 iyo 25, waxaa lagu qaadi karaa ciqaab ganaax ah ugu yaraan Sh. Som 500/- (shahanboqol) iyo ugu badnaan Sh. Som 5.000/- (shankun) haddii arrinta aanu ahayn dambi intaas ka sii culus

**Qod. 32**
**Laalista**

Xeer kasta oo ka soo horjeeda  ama aan la jaan qaadi karin Xeerkaan waa la laalay.

**Qod. 33**
**Dhangalka Galka**

Xeerkaan deg-deg ayuu u dhaqangalayaa waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rrasmiga.

Muqdisho, 13 Setembar 1973.

Guddoomiyha
Golaha Sare Kacaanka
**Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre**